

USDA Nondiscrimination Statement Update (Somali Translation)

For all other FNS nutrition assistance programs, State or local agencies, and their subrecipients, must post the following Nondiscrimination Statement:

Markay yihiin barnaamijyada kale ee taakulaynta nafaqada NFS, hay'adaha Gobolka ama maxalliga ah iyo, iyo kuwa hoostooda wax ka qaata, ayaa ah inay dhejiyaan bayaanka kala takoor la'aanta:

Waaxda Beeraha ee Dawladda Maraykanka ayaa mamnuucda kala takoorka lagulu kaco macaamiisheeda, shaqaalaha, iyo dadka shaqada ka codsada iyada oo ku salaysan sinjiyad, midab, asal qaran, da', naafonimo, jinsi, isku aqoonsiga jinsi, diin, ka aarsasho, iyo meeshay ku habboon tahay, aaminsanaan siyaasadeed, heerka guurka, heerka qoyska ama waalid ahaan, u jeedka gogol-wadaagga, ama dhammaan ama qayb ka mid ah dakhliga shakhsiga oo ka yimaad barnaamij kaalmo kasta oo dowladeed, ama macluumaad ku saabsan hiddaha ilaashan markay tahay shaqada ama barnaamij kasta ama hawl la fulinayo ama kharashka Waaxdu bixiso. (Dhammaan mamnuucyada ku salaynta ayaan ku dabqmi doonin dhammaan barnaamijyada iyo/ama hawlaha shaqada.)

Haddii aad rabto inaad ku xereyso cabasho Xuquuqda Madaniga barnaamijka oo takoor ku lug leh, buuxi [Foomka Ka Cabashada Ka Takoorka Barnaamijka USDA, ee laga helo onlayn halkan http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html), ama xafiis kasta oo USDA, ama wac (866) 632-9992 si aad u weyddiisato foomka. Waxa kale oo aad qori kartaa warqad ka kooban dhammaanba macluumaadk lagu weyddiistay foomka. Noo soo dir foomka cabashada oo dhammaystiran ama noogu soo dir warqad boostada cinwaankan U.S. Department of Agriculture, Director, Office of Adjudication, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410, faakis ahaan (202) 690-7442 ama ugu iimayl garee program.intake@usda.gov.

Shaqsiyaadka maqal la'aanta ah ama maqalka ku adag yahay ama naafanimo hadal leh ayaa kula xiriiri kara USDA Adeegga tebinta Federaalka (Federal Relay Service) lambarkan (800) 877-8339; ama (800) 845-6136 (Isbaanishka).

USDA waa siiye iyo shaqaaleeye fursad loo-siman yahay.